TALLAALKA HPV (Human Papillomavirus)

Cervarix® WAXAAD AAD U BAAHANTAHAY IN AAD OGAATO

1 Waa maxay HPV?

Genital human papillomavirus (HPV) waa fayraska ama jeermiga ugu badan Maraykanka ee galmada la isugu gudbiyo.

Kala bar in ka badan ragga iyo dumarka galmooda ayaa waxaa ku dhaca HPV mar uun inta ay nool yihiin.

Qiyaastii 20 million oo Maraykan ah ayaa hadda qaba, qiyaastii 6 million oo kalena sannad walba way qaadaan. Caadi ahaan HPV wuxuu ku fidaa galmada.

Infakshanada HPV badankood wax astaamo ah ma keenaan, kaligood ayayna baaba'aan. Laakiin, HPV wuxuu dumarka ku keeni karaa **kansarka kafka (cervical cancer)**. Kansarka ku dhaca kafku wuxuu kansarada dila dumarka ee aduunka oo dhan ka gelayaa kaalinta 2aad. Maraykanka gudihiisa, qiyaastii dumar dhan 10,000 ayaa waxaa ku dhaca kansarka kafka sannad walba iyadoo qiyaastii 4,000 la filaayo in ay u dhimato.

HPV waxaa kaloo xiriir loola sameeyaa dhawr kansar oo aan aad dadka ugu badnayn, sida kan siilka iyo midka timoolayda (vulvar) ee dumarka iyo noocya kale oo kansar ah oo rag iyo dumarba ku dhaca. Waxaa kaloo ay keeni kartaa burooyin (warts) ka soo baxa xubnaha taranka ama burooyin (warts) ka soo baxa cunaha.

Infakshanka HPV daawo malaha, laakiin dhibaatooyinka uu keeno qaar ka mid ah ayaa la daawayn karaa.

2 Tallaaka HPV – Maxaad isu tallaalaysaa?

Tallaalka HPV waa muhiim waayo **wuxuu ka hortegi karaa noocya badan oo ah kansarka kafka** ee dumarka, haddii qof la tallaalo inta aan fayrasku haleelin.

Waxaa la filayaa in difaaca uu keeno tallaalka HPV uu noqdo mid muddo jira. Laakiin tallaalku ma bedeli karo baaritaan lagu sameeyo kansarka ku dhaca kafka. Tallaalka awgiis waa in aysan dumarku joojin baaritaanka caadiga ah ee Pap test (baaritaanka lagu xameeyo xubinta taranka).

Tallaalka lagugu tallaalayo waa mid ka mid ah **labo tallaal oo loo qaadan karo ka hortagga HPV**. Waxaa la siiyaa dumarka oo kali ah.

Tallaalka kale waxaa la siin karaa rag iyo dumarba, wuxuuna ka hortegi karaa qaar ka mid ah kansarada siilka iyo timoolayda (vulvar), iyo burooyin (warts) ka soo baxa xubnaha taranka.

3 Yaa ay tahay in uu qaato tallaalka HPV goormana?

Tallaalka Caadiga ah

- Tallaalka HPV waxaa lagula talinayaa in ay qaataan gabdhaha **jiray 11 ama 12 sano**. Waxaa suurtagal ah in la siiyo gabdhaha da'doodu ka bilaabato 9 jir,

Maxay tahay sababta tallaalka HPV loo siiyaa gabdhaha markay jiraan da'dan?
Waa muhiim in gabdhuhu qaataan tallaalka HPV kahor intaysan galmada ugu horaysa samayn – waayo horay uguma soo dhicin human papillomavirus

Mar haddii uu fayrasku ku dhaco gabar ama naag, waxaa laga yaabaa in aan tallaalku u shaqayn si fiican amaba uusan shaqayn ba.

Tallaalka Ka Dabagaynta ah

- Waxaa kaloo lagula talinayaa talaalka gabdhaha iyo naagaha **jiray 13 illaa 26 sano** oo aan qaadan dhamaan 3 dose markii ay intaa ka da' yaraayeen.

Tallaalka HPV waxaa dadka laga siiyaa 3-dose oo isku xiga

Dose-ka 1aad:	Hadda
Dose-ka 2aad:	1 illaa 2 bilood kadib dose-ka 1aad.
Dose-ka 3aad:	6 bilood kadib dose-ka 1aad

Lagu talin maayo in dose-yo dheeraad ah (lagu xoojiyo) oo qofka la siiyo.

Tallaalka HPV waxaa qofka isla mar lala siin karaa tallaalada kale.

4 Dadka qaarkood waa in aysan qaadan tallaalka HPV ama waa in ay sugaan.

- Qofkii marna ay maaddo ku jirta talaalka HPV ku kicisay cadaanyo daran oo nafta halis gelisa ama dose hore ee tallaalka HPV, waa in uusan qaadan tallaalka HPV. U sheeg takhtarkaaga haddii qofka la tallaalayaa uu wax cadaanyo daran ah qabo oo ay ka mid tahay cadaanyada ay kiciso latex.
- Tallaalka HPV lagula talin mayo **Dumarka uurka leh**. Hase yeeshee, haddii taallaalka HPV qof uur leh la siiyo ma aha sabab uurka loo soo rido. Waxaa suurtagal ah in dumarka nuujinaaya tallaalka ay qaataan.

  Haweentii ogaata in ay uur lahayd markii ay qaadatay talaalka HPV waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay la xiriirto

sameeyaha **HPV diiwaankiisa haweenka uurka leh** kalana xiriirto 888-452-9622. Tani waxay nagu caawinaysaa in aan ogaano sida tallaalku u saameeyo dumarka uurka leh.

- Dadka qaba jirro fudud marka la rabo in la siiyo dose ah tallaalka HPV waa la tallaali karaa. Dadka qaba jirro **dhexdhexaad ah** ama xun waa in ay sugaan inta ay ka bogsanaayaan.

5 Waa maxay khataraha ka iman kara tallaalkan?

Tallaalkan HPV waxaa aduunka oo dhan laga isticmaalaayay dhawr sano wuxuuna ahaa mid aad amaan u ah.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa suurtagal ah in daawo dhammaanteed ay keeni karto dhibaatooyin daran, sida cadaanyo ba'an ama daran oo ay kiciso. Halista nooc kasta oo tallaal ahi uu ku keeni karo dhib weyn, ama dhimasho, aad bay u yartahay.

Cadaanyo nafta halis gelisa in tallaal uu kiciyo waa dhif. Haddiise ay dhacdo, waxay dhacaysaa waa dhowr daqiiqo illaa dhawr saacadood gudahood marka qofka la tallaalo kadib.

Waxaa la ogyahay in tallaalka HPV uu keeno **dhibaatooyin fudud ama dhexdhexaad ah**. Dhibaatooyinkaasi ma sii jiraan iskood ayayna u baaba'aan.

- Kuwo ka yimaada meesha irbadda talaalka lagu muday:
  - Xanuun (qiyaastii 10kii qofba 9 qof)
  - Guduudasho ama barar (qiyaastii 2dii qofba 1 qof)
- Dhibaatooyinka kale ee fudud:
  - Qandho/xumad ah 99.5°F ama ka kor (qiyaastii 8dii qofba 1 qof)
  - Madax-xanuun ama daal (qiyaastii 2dii qofba 1 qof)
  - Lalabo, matag, shuban, ama caloosha (saablayda) oo xanuunta (qiyaastii 4tii qofba 1 qof)
  - Murqaha ama isgoysyada/xubnaha oo xanuuna (qiyaastii 2dii qofba 1 qof)
- Suuxdin:
  Dhacdooyin ah suuxdin gaaban iyo astaamo la xiriira (sida qofka oo gariiraya ama ruxmaya) ayaa dhici kara mar kasta oo qof daawo la siiyo, tallaalkuna waa ka mid. **Waxaa suuxid iyo dhaawacyo ka yimaada dhicid lagaga hortegi karaa qofka oo tallaalka kadib 15 daqiiqo fadhiya ama jiifa**. U sheeg daryeel bixiyahaaga haddii bukaanku uu dawakho ama wareero, ama aragtida indhihiisu isbedelaan ama dhegihiisu qaylo ka yeerayso.

Sida tallaalada oo dhan, tallaalka HPV waa lala soconayaa haddii uu keeno wax aan caadi ahayn ama dhibaatooyin daran.

6 Ka waran haddii uu kiciyo cadaanya daran?

Maxaan ku gartaa?

Cadaanyo daran uu kiciyay oo ay ka mid tahay furuuruc; gacmaha iyo cagaha oo barara, wajiga ama bushumaha; neefsashada oo dhib noqota.

Maxaan sameeyaa?

- Wac takhtar, ama qofka isla markiiba takhtar u gee ama u hel.
- U sheeg takhtarka waxa dhacay, taariikhda iyo wakhtiga sidaasi dhacday, iyo goortii qofka la tallaalay.
- Weydiiso daryeel bixiyahaaga si aad u wariso cadaanyada uu kiciyay buuxina foomka Habka Gudbinta Dhibta Talaalku Keenay(Vaccine Adverse Event Reporting System [VAERS]). Ama waxa aad warbixintan ku gudbin kartaa bogga internetka ee VAERS ahna www.vaers.hhs.gov, ama adigoo wacaya 1-800-822-7967.

VAERS talo caafi maad ma bixiso.

7 The National Vaccine Injury Compensation Program (Barnaamijka Qaranka ee Magdhawga Dhaawaca Tallaalka)

The National Vaccine Injury Compensation Program (VICP) waxaa la sameeyay 1986.

Qofkii rumaysan in tallaal uu dhaacwac gaarsiiyay wuxuu qaansheeg ka diiwaan gelin karaa VICP isaga oo wacaya 1-800-338-2382 ama tegaya boggooda internetka ee www.hrsa.gov/vaccinecompensation.

8 Sidee wax intaa ka badan u ogaan karaa?

- Waydii daryeel bixiyahaaga. Waxay ku siin karaan warqadda la socota tallaalka ama waxay kuu sheegi karaan ilo kale oo aad warbixin ka heli kartid.
- Wac waaxda caafimaadka ee degmadaada.
- La xiriir Xarumaha Kahortagga iyo La Dagaalanka Cudurada (Centers for Disease Control and Prevention [CDC]):
  - Wac **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama
  - Tag bogga internetka ee CDC ahna **www.cdc.gov/std/hpv** iyo **www.cdc.gov/vaccines**

Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention
National Center for Immunization and Respiratory Diseases

Vaccine Information Statement (Interim)
Human Papillomavirus (HPV) *Cervarix* - Somali 3/30/10

Translation provided by the Minnesota Department of Health